



# SYRACUSE CITY SCHOOL DISTRICT

Jaime Alicea, Maamulaha Guud ee Dugsiyada

## Xafiiska Maamulaha Guud

Maarso 31, 2020

Qoysaskayaga Qaaliga ahow ee Dugsiga Degmadda Syracuse,

Lagasoo bilaabo Maarso 27keedii Gudoomiyaha Gobalka Cuomo ayaa ku dhawaaqday in dhammaan dugsiyada ku yaala New York ay xirnaan doonaan ilaa Abriil 15keeda. Waxaan la shaqaynaynay Waaxda Waxbarashada Gobalka New York (New York State Education Department) iyo Xafiiska Gudoomiyaha Gobalka lagasoo bilaabo markii lagu dhawaaqay amarkaas si loo kala caddeeyo saamaynta uu go'aankani ku yeelan doono Fasaxeenii Horay loo qorsheeyay Abriil (Abriil 6-10).

Haddan waxaan ogaanay in dhammaan degmooyinka ay qasab ku tahay inay sii wadaan bixinta waxbarashada onleenka ah ee arday, cuntooyinka ardayda, iyo daryeelka carruurta shaqaalaha lama huraanka u ah bulshada maalin kasta todobaadka inta u dhaxaysa Abriil 1, 2020 ilaa Abriil 14, 2020, xataa haddii degmadda loo qorsheeyay inay fasaxa gu'ga gasho waqtigaas. Tani waxay ka dhigan tahay in aynu sii wadayno bixinta taageerada tacliinta iyo cuntada ay siino ardaydeena inta lagu jiro Fasaxeenii hore loo ogolaaday ee qorshaysnaa Abriil .

Macalimiinteena, maamulayaasheena iyo shaqaalaha caawiyeyaasha ahiba waxay sii waddi doonaan bixinta shaqada tacliinta ee dhammaan ardayda inta lagu jiro todobaadka Abriil 6-10. Waxaan rajaynaynaa inaad joogtayn doontaan jadwal joogto ah oo cunugaagu lahaado siina wadi doontaan inay ilmuhu dhammeeyaan shaqada loo diray. Waxaan sidoo kale bixin doona quraac iyo qado safaari ah oo lagu bixin doono goobahayaga loo qoondeeyay laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 12 duhurnimo maalaha Isniinta, Arbacada iyo Jimcaha.

Gugsiyada xiran awgeed, waxaan go'aan ku gaadhnay in 6da Maarso, 2020 ay hadda ahaan doonto dhammaadka taariikhda muddada sixitaanka ee sadexaad. Ardaydu waxay haystaan ilaa 10ka Abriil inay kusoo gudbiyaan shaqo kasta oo loo diray ka hor Maarso 6deedii. Haddii cunugaagu wax su'aalo ah kaqabo layliyada muddada sixitanka ee sadexaad fadlan u sheeg inuu la xariiro macalinka ama waco dhismaha maamulaha dugsiga.

Waxaan doonayaa inaan idiin ka mahadceliyo taageeradiina joogtada ah iyo dulqaadkiina maadaama aan iska kaashanayna inta lagu jiro waqtigan aan horay u dhicin.

Fadlan badbaado ku jooga,

Jaime Alicea  
Maamulaha Guud ee Dugsiyada